

Magaca Ardayga	Lambarka Aqoonsiga Ardayga
Dugsiga	Fasalka

Oggolaanshaha Waalidka ee Isticmaalka Tiknoolajiyada Waxbarasho ee Fasallada Dugsiyada Sare ee LPS

Qalabka Kombiyuutarka

Qalabka kombiyuutarka ee ardayda ayaa taageeraya manhajka dhijitaalka ah iyo waxbarashada ee fasallada Dugsiyada Dadweynaha ee Lexington (LPS). Qalabka ay isticmaalaan ardaydu wuu kala duwan yahay iyadoo la eegayo da'da, kartida, iyo xaaladda waxbarasho (kumbiyuutarada miiska, kiniiniyada, iwm.).

Isticmaalka Internet-ka

Qalabka ay isticmaalaan ardayda wuxuu gali karaa internet-ka wuxuuna awood u siinayaa in ay adeegsadaan barnaamijyo dhijitaal ah, taasoo u suurtagelinaysa ardayda inay ka qayb qaataan waxbarasho dhijitaal ah iyo fursado kale oo waxbarasho oo leh ilaalin si joogto ah loo maamulo, iyadoo aan loo eegayn shabakadda martida loo yahay.

Ilaalinta Xogta

Ardaydu waxay geli karaan aaladaha khadka tooska ah iyadoo adeegsanaya akoonkooda LPS. LPS waxay si aad ah uga taxadartaa ilaalinta xogta shaqsiga ah ee ardayda. Wixii faahfaahin ah booqo lexschools.org.

Filashada Anshaxa

Isticmaalka qalabka waa mudnaan, ma aha xuquuq. Ardaydu waa inay muujiyaan taxadar iyo masuuliyad marka ay isticmaalayaan qalabkan. Qalabka waa in si badbaado leh oo degdeg ah loogu soo celiyo LPS haddii la codsado.

KU SAABSAN MAS'UULIYADDA DHAQAALAAD:

Qoysaska ayaa mas'uul ka ah burbur ula kac ah oo ay ardaydoodu u geystaan hantida LPS. Sidoo kale, qoysaska ayaa mas'uul ka ah dhammaan kharashaadka dayactirka qalabka loo qoondeeyay ardaygooda. Waxaa jirta Barnaamijka Ikhtiyaariga ah ee Ilaalinta iPad-ka si looga ilaaliyo ardayda iyo qoysaska inay si buuxda u qaadaan mas'uuliyadda dhaqaalaha ee dayactirka ama beddelka iPad-ka.

WAALIDKA AMA ILAALIYAHA AH:

- Waxaan oggolahay oo oggolaanayaa in ilmahaygu isticmaalo qalabka kombiyuutarka ardayda ee LPS iyo kheyraadka tiknoolajiyada kale inta uu ku jiro waxbarashada LPS. Waxaan fahamsanahay in LPS isticmaasho habka sifeynta si loo ilaaliyo sharciyada federaalka ee gudaha iyo dibaddaba shabakadda LPS. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in sifeyntu beddel uma noqonayso kormeerka dadka waaweyn, anigoo garwaaqsan masuuliyadayda kormeerka ilmahayga marka uusan dugsiga joogin.
- Waxaan oggolahay in isticmaalka tiknoolajiyada uu yahay mudnaan, ma aha xuquuq, ayna tahay in ilmahaygu raaco siyaasadaha Guddiga Dugsiga LPS marka uu isticmaalayo tiknoolajiyada. Wixii faahfaahin ah, eeg qeybta 'Isticmaalka Internet-ka iyo Kombiyuutarada Ardayda' ee 'Buugga Waalidka' oo laga heli karo: lexschools.org.
- Waxaan oggolahay in LPS bixiso xog xaddidan oo looga baahan yahay ilmahayga si uu u isticmaalo aaladaha khadka tooska ah ama qalabka tiknoolajiyada waxbarasho ee uu oggol yahay maamulka LPS. Sidoo kale, waxaan oggolahay in LPS ay xogtan magaca iga siiso iyadoo la raacayo Xeerka Ilaalinta Asturnaanta Caruurta ee Khadka Tooska ah (COPPA), Xeerka Ilaalinta Internet-ka ee Carruurta (CIPA), Wax-ka-beddelka Xuquuqda Ardayda (PPRA), Xeerka Xuquuqda Waxbarasho iyo Asturnaanta Qoyska (FERPA), iyo sharciyada kale ee federaalka ama gobolka.
- Waxaan oggolahay in oggolaanshahan uu sii socon doono inta uu ilmahaygu ka diiwaan gashan yahay Dugsiga Dhexe ee Lexington ama Dugsiga Sare ee Lexington, ilaa iyo inta waalidka/ilaaliyaha uu ka beddelayo go'aankaas.
- Si gaar ah waxaan oggolahay inaan damaanad qaado oo aan ka ilaaliyo Dugsiyada Dadweynaha ee Lexington dhammaan mas'uuliyadaha, khasaarihii, sheegashooyinka, kharashaadka, ama wax kasta oo ka dhasha isticmaalka qalabka LPS ama waxyaabaha aan la oggolayn ee laga daawaday ama laga soo dejiyay qalabkaas.

Waxaan jeclaan lahaa in ilmahaygu si buuxda uga qaybqaato waxbarashada dhijitaalka ah ee loo adeegsado qalabka kombiyuutarka ee ardayda Dugsiyada Dadweynaha Lexington.

Magaca Waalidka/Ilaaliyaha (daabacan)

Saxiixa Waalidka/Ilaaliyaha

Taariikhda

HADII AAD DIIDAYSO, farta ku saxi oo muujiso in ilmahaaga aan loo oggolaan isticmaalka qalabka kombiyuutarka nooc kasta ha ahaadee gudaha fasallada LPS, xarumaha kombiyuutarada, maktabadaha, ama meelaha kale, marka laga reebo imtixaannada qasab ah ee LPS iyo gobolka.

MAYA